

Adiga iyo shaqaalaha daryeelka bulshada – maxa laga filan karaa

Shaqaalaha daryeelka bulshada waxay kugu caawinayaan inaad nololshaada ugu noolaato qaabka aad rabtid

Si loo xaqiijyo in shaqaalaha Wales ku siiyaan daryeel wanaagsan iyo taageero, Daryeelka Bulshada Wales wuxuu leeyahay (Social Care Wales) Xeerka Hab dhaqanka Xirfadlaha ee Daryeelka Bulshada (Code of Professional Practice for Social Care) (Xeerka) oo diiwaangeliyo kooxyo shaqaale ah si loo hubiyo inay ku haboonyihiin shaqada.

Xeerku waa shuruuc, ama heerar, xirfadleyaasha daryeelka waa inay ka shaqeeyaan, si ay kaaga caawiyaan inaad badqabto oo aad fayo qabtid. Buug-yarahan wuxuu kaa caawinayaa inaad ogaato waxa heerarka yihiin.

Maxa Xeerku sheegayan/leeyihin

Si lagu siiyo daryeelka iyo taageerada ugu fiican, shaqaalaha daryeelka bulshada waa inay:

- kaa caawiyaan inaad sheegtid aadna gaartid waxa adiga muhiimka kuu ah
- xushmeeyaan sharaftaada, astumaantaada, doorbidaada, dhaqankaaga, luqadaada, xuquuqahaaga, aaminaadaha, aragtidaada iyo waxa aad rabto
- waxaan ku taagyeeraya si aad u badqabto
- ahaaw daacad, aamin ah oo lagu kalsoonaan karo
- u qalmaan in shaqadooda ay sida ugu haboon u qaban karaan.



Halkeen ka heli karaa Xeerka?

Xeerka waxaa laga helayaa onleenka/Khadka tooska ah socialcare.wales/code ama i-meelkaan noogu soo dir codes@socialcare.wales

Qofkee ayay waajib ku tahay inuu raaco Xeerka?

Dhammaan shaqaalaha daryeelka bulshada waa inay raacaan Xeerka xittaa haddii aanan hadeer laga filaneynin inay is diiwaangeliyaan. Shaqaalaha daryeelka bulshada ee naga diiwaangashan waa inay raacaan Xeerka si loo sameeyo shaqada daryeelka bulshada. Waxay kala yihiin:

- maareeyayaasha guryaha daryeelka ee dadka waaweyn
- maareeyayaasha daryeelka guriga iyo shaqaalaha daryeelka guriga
- maareeyayaasha daryeelka carruurta deegaanka iyo shaqaalaha daryeelka carruurta deegaanka
- maamulayaasha xarunta qoyska deegaanka
- shaqaalaha bulshada iyo ardayda shaqada bulshada





Waqti ka waqti, kooxyada kale waxaa lagu daraa Diiwaaniyaha. Qorshooyin ayaa diyaarsan si loo diiwaangeliyo shaqaalaha xiggo inaga:

- maamulaha adeega korsashada
- shaqaalaha guryaha daryeelka ee dadka weyn
- maamulayaasha meeleynta ee dadka weyn
- maamulayaasha u dooditsa ee la shaqeeya carruurta
- Maamulayaasha adeega korinta
- shaqaalaha xarunta qoyska deegaanka.

Diiwaankayagu wuxuu hubiyaa in shaqaalaha:

- ku habboon yihiin ayna awoodaan shaqada
- leeyihiin dabeecad wanaagsan
- Waxa aay leeyihiin aqoonta ay u baahanyihiin
- ogolaaday inaan joogteeyo *Xeerka Hab dhaqanka Xirfadlaha (Code of Professional Practice)*.

Waxa aad ka hubin kartaa si aad u aragtid haddii shaqaalaha ka diiwaangashanyahay

www.scwonline.wales/en/search-the-register/

Maxaad sameyn kartaa haddii shaqaalahaaga daryeelka bulshada uusan u hogaansameyn Xeerka?

1. Aqri Xeerka si aad u hubisid heerarka ee socialcare.wales/code
2. La wadaag walaacyadaada shaqo-bixiyahaaga shaqaalaha daryeelka oo weydii waxa ay sameyn doonaan
3. Haddii badrooniga uusan sheegin walaacaaga, waxaad weydiin kartaa nuqulka habraacyadooda cabashada si uu kaaga caawiyo inaad ogaato waxa xiga ee aad sameyn karto
4. Haddii shaqaalaha naga diiwaangashanyahay aynan caawinin la hadlida badrooniga i-meel u soo dir jirdhisnaanteena kooxda jimicsiga si aad ugu tababaratiid ftp@socialcare.wales oo waxay kugu jawaabayaan taleefon ama i-meel ahaan waxay ku xirantahay doorbiditaankaaga.

Haddii aad ka walaacsantahay heerka daryeelka ay bixiyeen shirkada ama hay'ada, waxaad kala xiriiri kartaa Kormeerka Daryeelka Wales (Care Inspectorate Wales) 0300 7900 126, ee ciw@gov.wales ama booqo websaydkooda careinspectorate.wales

